



Waaxda Booliiska Minneapolis Buugga Xeerka iyo Nidaamka Booliiska

Lambar:
5-300

Mujalladda shanaad - Xeerka Anshaxa iyo Isticmaalka Xoogga

Isticmaalka xoogga

5-314 Doorashada Xakamaynta - Aaladaha siidaysa jug kala weecin oo iftiimaysa
(10/16/02) (08/16/07) (xx/xx/23)

I. Ujeedo

Ujeedada xeerkan ayaa ah in la ballaariyo shuruudaha xeerarka kale ee xoogga, gaar ahaan kuwa la xiriira Aaladaha siidaysa jug kala weecin oo iftiimaysa

II. Qeexitaan

A flash sound diversionary device (FSDD) Aaladaha siidaysa jug kala weecin oo iftiimaysa: Aaladaha siidaaya jug kala weecin oo iftiimaysa, sidoo kale loo yaqaan qalab "jug-weyn siidaaya", waxay soo saartaa jug weyn oo leh iftiin dhalaalaya oo loogu talagalay inay keento isku-dhexyaac iyo jahwareer si ay u siiso kooxda xeeladaysan dhowr ilbiriqsi oo kafaideysi.

Erayada lagu qeexay P&P 5-302:

- Qaadis
- Geyn
- Ridista
- Muujin
- Ku howlan la beegsadaha
- Ku taagis
- Isticmaal

III. Xeer

A. Xeerka iyo Mabaadi'da Hagidda

Marka lagu daro u gaar ahaanshaha xeerkan, shaqaaluhu waa inay raacaan shuruudaha dhammaan xeerarka kale ee khuseeya, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn, Mabaadi'da Hagidda iyo heerarka kale ee P&P 5-301.

B. Waafaqsan Xeerka iyo Tababarka

Saraakiishu waa inay u isticmaalaan oo kaliya FSDD si aan kala sooc lahayn (non-discriminatory), waana marka aw xooggaasi macquul yahay oo uu waafaqsanyahay tababarada MPD ee hadda jira iyo xeerarka MPD ee xukuma isticmaalka xoogga (oo ay ku jiraan dhammaan qaybaha P&P 5-300).

C. Rabshadaha Madaniga ah iyo Isku-Imaanshaha

Si waafaqsan P&P 7-805, FSDDs looma isticmaali karo xakamaynta dadka, ka xakamaynta dadka ineysan meela kale gaarin, ama kala burinta dadka.

D. Tababarada loo baahanyahay

1. Kaliya shaqaalaha loo tababaray isticmaalka qalabkan ayaa ridi kara.
2. Tababarka waaxdu ansixisay waa in ay ku jiraan magacaabista, hawlgalka farsamada, iyo hawlgelinta xeeladaha FSDDs.
3. Dhammaan xubnaha SWAT waa in sidoo kale lagu tababaraa Waaxda Dab-demiska Minneapolis isticmaalka dab-demiska kiimikada qallalan. Waxaa xoogga la saari doonaa tixgalinta amniga iyo tillaaboooyinka la isticmaalayo marka la isticmaalayo qalabkan.

E. FSDD-da waaxdu soo saartay

Saraakiisha MPD waxa kaliya oo loo fasaxay inay isticmaalaan FSDD-yada ay bixiso waaxdu.

F. Kaliya loogu talagalay isticmaalka SWAT

1. FSDD-yada waa in loo qaybiyaa oo loo adeegsadaa oo keliya iyadoo ay hoos imanayso awoodda Taliyaha SWAT ama wakiilka, kaas oo samayn doona go'aan ku saabsan isticmaalka qalabkan iyadoo lagu salaynayo kiiska.
2. Taliyaha SWAT ama cidda u xilsaaran in ay qaybiyaan oo ay kormeeraan isticmaalka qalabayada.

G. Bakhtiyi La heli kari

Marka qalabka la isticmaalo, xubin ka mid ah kooxda gelitaanka waa in aw sitaa bakhtiiye kiimiko qalalan kujirto si loogu isticmaalo dhacdada dab.

H. Daawaynta iyo Gargaarka Caafimaadka

Saraakiisha ayaa bixin doona daawayn kasta oo lagama maarmaan ah si waafaqsan P&P 5-301 and P&P 7-350.

I. Qorista cadaynta

Saraakiishu waa in ay qoraan isticmaalka FSDD-yada sidii adeegsiga xoog si waafaqsan xeerka xoogga warbixinta (P&P 5-302).